**Xeerka L. 215 rep**

**Xeerarka doorashada wakiillada beelaha yar yar ee ka tirsan Guddonka Dalka.**

**MAAMULKA WASAAYADDA TALYAANIGA EE SOMALIYA**

**XOGHAYAHA GUUD**

Kadib marki la arkay dekreetada Madaxweynha Jamhuuriyadda lamba. 2357 ee 9 Disember 1952;

Kadib marki la arkay faqradda 3 ee qodobka 9 ee isla dekreetadaas;

Kadib markii la arkay amar-sharciga lamb 6 ee 31 Maarso 1955 oo la xiriirka dorashada Guddoonka Dalka;

Kadib markii la arkay qod. 4 ee isla amar-sharciga sare ku xusan oo tilmaameysa in dadka laga tira badan yahay loo soo dorto Golaha Shacabka ay dadkoodu soo doortan oo lagu soo xeeriyo nidaam oo Maamulku ku soo bandhigi doono dekreeto;

Kadib markii la arkay dekreetada lamba. 93 ee 27 Maayo 1955 lagu tilmaamay biloowda dorashooyinka Guddoonka Dalka;

Kadib markii la garoowsaday baahida loo qabo in la fuliyo amaradda lagu qoray qod. 3 ee amar-sharcig lamba. 6 ee 31 Maarso 1955;

**WAXAA LA AMRAY**

**Qod. 1**

Wakiilada metelaayo dadka laga tira badan yahay ee loo doorto Guddoonka Dalka sida ku cad qodobka. 4 ee amar sharciga taarikhdisu taahay 31 Maarso 1955, waxaa soo dooran doono Guddiga Dorashooyinka ee bulshada ay tirsan yihiin ee liiska musharaxiinta iyadoo cod si toos ah oo qarsoodi ah lagu soo dooran doono.

Bulsha kasto waxay iska soo dhex qaban doontaa musharaxiinta iyo xubnaha Guddiga Doorashooyinka iyagoo qaban qaabin doono shirar lagu habeeyey sida ay tilmaami doonaan qodobada soo socda.

**Qod. 2**

Waxaa shirarkaasi ka soo qeyb geli kara ciddi ka tirsan bulshadaasi oo deggenaa dalka muddo ilaa 1 sano oo da'doodu ay tahay 21 iyo ka weyn.

**Qod. 3**

Waxaa xaq uu yeelanaya in loo dorto La-taliye Dalka ciddi ka tirsan bulshooyinka laga tira badan yahay oo deggenaa dhulka Somaliya ugu yaraan 1 sano oo akhri kara qorina kara afka Carabiga iyo midka Talyaniga oo ay u dhamaatay dad 25 sano.

**Qod. 4**

Shirarka bulshooyinka laga tira badan yahay waxaa lagu qaban doona goobaha halkaan lagu soo qoray, musharaxiintana waxay noqon doonaan kuwa halkaan ku tilmaaman.

**BULSHADA CARABTA**

Muqdisho 7 musharax 14 xubno Guddiga Doorashoyinka

| | | | |
|---|---|---|---|
| Marka | 3 musharax | 6 xubno | Guddiga Doorashooyinka |
| Afgoye | 1 musharax | 2 xubno | Guddia Doorashooyinka |
| Jowhar | 2 musharax | 4 xubno | Guddiga Dorashooyinka |
| Kismaayo | 2 musharax | 4 “ | “ ‘ |
| Jamaame | 2 “ | 4 ‘ | ‘ ‘ |
| Jelib | 1 “ | 2 “ | “ “ |
| Baydhaba | 2 “ | 4 ‘ | “ “ |

**BULSHADA TALYAANIGA**

| | | | |
|---|---|---|---|
| Muqdisho | 8 musharax | 16 xubno | Guddiga Doorashooyinka |
| Marka | 5 “ | 10 “ | “ “ |
| Afgoye | 2 “ | 4 “ | “ “ |
| Jowhar | 3 “ | 6 ‘ | ‘’ “ |
| Kismaayo | 2 “ | 4 “ | “ “ |

**BULSHADA HINDIDA**

| | | | |
|---|---|---|---|
| Muqdisho | 3 musharax | 6 xubno | Guddiga Doorashoyinka |
| Kismaayo | 2 “ | 4 “ | “ “ |

**BULSHADA BAKIISTANKA**

| | | | |
|---|---|---|---|
| Muqdisho | 4 musharax | 8 xubno | Guddiga Doorashoyinka |
| Marka | 1 “ | 2 “ | “ “ |

**Qod. 5**

Shirarka bulsho kasto waxaa la qaban doonaa isla hal maalin dalka gebi ahaantiisa.

Maalinta shirkuu dhici doono waa mid horay Maamulku oo uu cayimay waxaana lagu wargelin doonaa bulsha kasta iyadoo la soo bandhigi doono 20 beri ka hor intii aan la gaarin taarikhdaasi.

Shirarkaasi bulshooyinka laga tira badan yahay waxaa ka soo qeyb geli doono cid kasta oo ka tirsan bulshada meel kasto ha ka deeganaato dalka Somaliya.

**Qod. 6**

Shir kasto waxaa hoggamin doono Guddi Hoggaan oo ka kooban 3 ilaa 5 xubnood oo ugu mudan oo kadib markii lala tashtay Guddomiyaha Degmooyinka qaabilsan ay soo magacaabeen Guddomiyaha Gobolka.

Go’aaminta Guddiga Hoogganka waa mid kama dambeys waxaana lagu gaari doono hal dheeri. Waxaa laga rabaa in hubsimo ku sameeyaan ciddii ka soo qeyb galeysa shirarkaasi.

Shir kasta waxaa ka soo qeyb qaadan karo si loo dhowro habsamida , Guddomiya Degmada ama sarkaal ka tirsan Maamulka oo uu soo magacaabay Hogganka Arrimaha Gudaha.

**Qod. 7**

Shir kasto sida ku cad qodobka 4, socoodi musharaxiinta iyo doorashada xubnaha Guddiga Doorashada waxaa lagu xeeri doona nidaamka uu isla shirku dajiyo.

Shirku waa mid taaba geli doono iyadoo aan loo fiirin tirada dadka ka soo qeyb galay.

## Qod. 8

Shir kasto waxaa laga qori doonaa war bixin oo uu Guddigu 3 nuqul ka dhigaayo oo lagu tilmaami doono tirada soo xaadirtay shirka , tilmaamaha ciddi loo soo socay musharax iyo xubnaha Guddiga Doorashooyinka oo la doortay.

Hal nuqul waxaa loo diri doona Guddomiyaha Gobolka ee aaga lagu qabtay shirka kaaso oo lagu soo bandhigi doono Gobolka. Waxaa la ogol yahay in loo dacwoodo Garsooraha Gobolka 3 beri gudahoodo waxaa go’aan kama dambeys ah gaari doono Garsooraha Somaliya.

Nuqulka labaad waxaa loo diri doona Hogganka Arrimaha Gudaha ee hoos taaga Maamulka kaas oo ku xiri doono warbixin habka ay u dhaceen shirarku.

Nuqulka seddaxaad waxaa loo diri doona Guddomiyaha Degmada qaabilsan oo ku keydin doonto xfiiska si fursad loo siiyo ciddi ka tirsan bulshadaas oo rabto in ay dib u aragto.

Hoggaanka Arrimaha Gudaha, wuxuu isku duba ridi doonaa warbixinada isagoo soo saari doono liis kooban ee musharaxiinta oo idil iyo xubnaha Guddiga Doorashooyinka ee la soo soocay.

## Qod. 9

Coddeynta La-Taliyeyaasha Dalka ee metelaaya danaha bulshooyinka laga tira badan yahaywaxay ka dhici doonta magaalada Muqdsho, waxaana soo dooran doono Guddiyada Doorashooyinka sida lagu carifay qodobadda horay lagu soo tilmaamay, maalmaha uu Maamulku carifo.

Guddiga Doorashooyin kasto, intii uusan ku dhaqaaqin arrimaha codeynta wuxuu tilmaamaya xafiiska Codeynta oo ka kooban Guddomiyaha iyo 2 Kormeereyaal.

Guddomiyuhu wuxuu u xilsaaraya qof ka tirsan inta soo xaadirtay in uu fuliyo howlaha Xoghayaha Xafiiska.

Xafiis kasto ee Codeynta waxaa lagu soo lifaaqaya sarkaal ka tirsan Maamulka oo ay soo magacawda Hogganka Arrimaha Gudaha oo fulin doono howlaha kormeerka.

## Qod. 10

Codeyntu waxay ku dhacaysa iyadoo qol u gaar  lagu qori doono kaarar ay keentay Hogganka Arrimaha Gudaha si loo suggo sirta codka.

Xubin kasto ee Guddiga Codeynta, xatta xubnaha Xafiiska Doorashooyinka waxay xaq u leeyihin hal cod, kuwaax ku qori doono gudaha kaarka afka Carabia ama Talyaaniga magaca hal musharax oo keliya.

Karku waa wax kuma ool haddii:

— Uusan ahayn midkii loogu tala galay;
— Magaca ku qoran uusan ahayn magaca musharaxa ama uu wato calaamado micna la’an ahaan lagu qoray;
— Haddii magaca musharaxu uu ku qoran yahay af ka duwan midka Carabiga ama Talyaaniga;
— Haddii magac la’aan yahay ama magacya badan lagu qoray.

## Qod. 11

Howlaha codeynta iyo kormeerkiisa waxaa ansixi doono Xafiiska Doorashooyinka, kaas oo si kama dambeyn doono go’aamin doono ansixidda ama baa’binta  ictiraafidda kaararka iyo shilaalka ka dhaco waqtiga codeynta lagu jiray.

Si loo gaaro go’anka ansixidda karaarka waxaa loo baahan yahay in la helo aragti mideeysan ee Xafiiska Codeynta. Haddii ay is khilaafaan aragtidooda, kaarku wuxuu noqonaya mid muran ku jiro waxaana go’aamin doono Garsooraha Gobolka Banadir.

Fulinta codeynta waxaa laga qori doona warbixin oo laba nuqul laga dhigo oo uu saxiisi doono Guddomiyaha iyo 2 Kormeereyaal.

Hal nuqul waxaa loo diri doona Garsooraha Golbolka Benadir iyadoo lau lifaaqay karaarka la ansixiyey, kuwa qaladka noqday ama muranka ka taagan yahay iyo nuqulka liiska musharaxiinta, xubnaha Guddiga Doorashooyinka oo laga soo ansixiyey Hogganka Arrimaha Gudaha.

Nuqulka kale waxaa loo diri doona Hogganka Arrimaha Gudaha oo u keydin doono ciddi dooneysa in ay dib u eegto.

**Qod. 12**

Garsooraha Gobolka ee Banaadir kadib markii uu go’aan ka gaaro karaarka muran ka taagnay wuxuu amri doonaa kala horeynta mushaaraxiinta wuxuna qaxiyi doonaa mushaaraxiinta helay codadka ugu badan oo loo doortay in ay noqdaan La-Taliyeyaalka Dalka.

Haddii ay dhacday in si isla siman codeyntu ay u dhacday, waxaa la qaadan doonaa musharaxa ugu da’da weyn.

Ku dhawaaqidda ciddii la doortay waxay noqon doonta sida ku qoran faqradda ugu dambeeya ee qodobka 4 ee amar-sharci lamba. 6.

Hadddii ku dhawaaqidda ciddii la doortay uu yeesho Garsoore aan ahaayn Garsooraha Gobolka Benadir waxaa loo soo gudbin doona midkaan.

**Qod. 13**

Fulinta howlaha lagu carifay qodobka sare ee 12, Garsooraha Gobolku wuxuu warbixin waafi oo 3 nuqul ka kooban ka qori doonaa; nuqul waxaa loo diri doona Garsooraha Somaliya iyadoo lagu lifaqaay wixii qoraalka, karaar oo idil, midna Hogganka Arrimaha Gudaha, midda kalena waxaa lagu keydin doonaa xafiiskiisa.

Doorashooyinka La-taliyeyaasha Dalka ee metelaayo bulshooyinka laga tira badan yahay waxaa lagu dabaqi doona qod. 66 ee amar-sharciga lamba. 6.

**Qod. 14**

Xubanaha Guddiga Doorashooyinka oo aanan degeen magalada Muqdisho waxay xaq u yeelanayaan in loo celiyo kharajka safar oo uu Maamulku u garto in ay xaq tahay.

**Qod. 15**

Kharajka ka soo arooray hirgelinta dekreetadaan waxaa laga bixin doona misaaniyaada sanadka ee 1955.

**Qod. 16**

Wixii ka baxsan intaa ay tilmaamtay dekreetadaan waxaa loo noqon doona amaradda ku qoran amar-sharciga lamba. 6.

**Qod. 17**

Dekreetadana waxay hirgeli doonta kadib markii lagu soo bandhigo Faafinta Rasmiga.

Muqdisho, 26 Nofember 1955.

Xoghayaha Guud

**Franca**

Waxaa la arkay lana diiwan geliyey – diwaan lamba. 12 bogga  lamba. 90

Muqdisho, 29 Nofember 1955.

Xisaabiyaha Guud: **Spadaro**